


JAMHUURIYADDA SOMALILAND

Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoloojiyadda

**XEER-NIDAAMIYAH DHISSMAHA GOOBAHA
ISGAADHSIINTA**

Xeer-Nidaamiye Lr.02/2019



ARAAR

- Markaan Arkay:** Qodobka 3aad faqradihiisa 13aad iyo 14aad ee Xeerka Boosaha iyo Isgaashsiinta Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr, 50/2011;
- Markaan Arkay:** Kobaca iyo hormarka baaxadda leh ee Isgaadhsiinta casriga ah oo ay hormood u yihiin Shirkaddaha Isgaadhsiinta dalku;
- Markaan Arkay:** Waajibaadka wasaaraddu qaranka u hayso masuulkana uga tahay oo ah mid balaadhan una baahan in loo fuliyo si haboon;
- Markaan Tixgaliyay:** Baahida loo qabo in la helo xeer-nidaamiye si haboon oo tifatiran u faahfaahiya dhismaha goobaha isgaadhsiinta iyo wax-ka beddelkooda.
- Sidaa Daraaddeed:** Waxaan halkan ku soo saaray Xeer-Nidaamiyaha Dhismaha Goobaha Isgaadhsiinta, Xeer-Nidaamiye Lr. 02/2019.

Dr. CabdiWali Sh. Cabdillahi Suufi Jibriil

Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta & Teknoolajiyadda.

CUTUBKA 1AAD

MASUULIYADAHA GUUD

Qodobka 1aad

Hordhac

Isbeddelka xawliga ah ee ay ku socdaan aaladaha lalinta adeegyada iyo shebekadaha isgaadhsinta Somaliland ayaa sabab u ah in ay mar kasta wasaaraddu horumariso isla markaana ay diyaariso xeer-nidaamiyayaal, tilmaamayaal iyo hagayaal loogu talo galay ka-war-haynta iyo la-socodka qalabkaas. Xeer-nidaamiyaha halkan ku qorani waxa uu ka hadlayaa qaab dhismeedka iyo maareynta goobaha loo adeegsado isgaadhsinta.

Wasaaraddu waxa ay dhiiri-galineysaa in ay ruqsadleyaashu wadaagaan goobaha loo adeegsado isgaadhsinta. Taasi waxa ay ruqsadleyaasha ka yaraynaysa kharashka galaya goobaha isgaadhsinta sidoo kalena waxa ay u sahlaysaa inay gaadhaan meelo fog, taas oo ka qayb-qaadanaysaa fidinta adeegyada isgaadhsinta iyo ilaalinta bilicda magaalooinka dalka.

Xeer-nidaamiyahan waxa soo saartay Wasaaradda Isgaadhsinta iyo Teknoolajiyadda ee Somaliland sida waafaqsan Qodobka 3aad faqraddiisa 13aad ee Xeerka Isgaadhsinta Somaliland **Xeer Lr. 50/2011**.

Qodobka 2aad

Magaca Xeer-Nidaamiyaha

Xeer-Nidaamiyahan waxa loogu yeedhayaa **Xeer-Nidaamiyaha Dhismaha Goobaha Isgaadhsinta, Xeer-Nidaamiye Lr.02/2019.**

Qodobka 3aad

Dabbaqaadda

Xeer-nidaamiyahan waxa lagu dabbaqayaa ruqsadlaha bixiya adeegyada isgaadhsinta iyo qandaraasleyaasha la shaqeeya iyada oo loo eegayo xeerka boosaha iyo isgaadhsinta Somaliland Xeer Lr. 50/2011 iyo xeerarka caalamiga ah ee la xidhiidha maareynta goobaha isgaadhsinta.

Qodobka 4aad

Erey-Bixin

Goob Isgaadhsiineed (Telecommunication Site): waa goob loogu talo-galay in la dhigo qalabka isgaadhsiinta ee ay ka mid yihii, taawarka, korantada, qolka qalabka isgaadhsiinta iyo qolalka maamulka iyo ilaalada.

Hay'adda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn (ICNIRP): Waa komishan caalami ah oo ka shaqeeya wacyi-galinta iyo soo saaridda warbixinaha la xidhiidha badbaadada shucaaca qalabka electaroonigga ah sida moobilada iyo qalabka isgaadhsiinta.

Hir (Frequency) "f": Waxa loola jeedaa mawjadaha aan danabaysnayn ee u dhaxeeya 3 KHz ilaa 300 GHz kuwaas oo looga faa'iidaysto lalinta adeegyada isgaadhsiinta.

Kaabayaal Dab (Back Up Electricity): Waa qalab dab-kaydin oo la adeegsado marka uu tago laydhka toos-ka ah.

Laydhka Digniinta (Warning Lights): Waa laambado loogu talo-galay in lagu xidho meelo ka mid ah taawarka si diyaaraduhu ay u arkaan marka ay ka soo degayaan madaarada iyo marka ay ka kacayaan.

Maayadaha aan Danabaysnayn (Non-Ionizing Radiation NIR): maayadaha oo la macno ah shucaaca, waxa ay u qaybsamaan laba nooc oo kala ah (maayado danabaysan) iyo (maayado aan danabaysnayn). Maayadaha aan danabaysnayn waxa ay ka soo baxaan qalabka loo adeegsado nolol maalmeedka caadiga ah sida moobilada, rimood-yada, moofada microwave-ka, laambadaha, iwm. Halka maayadaha danabaysan ay ka soo baxaan Aaladaha laga dhaliyo Niyukliyeerka, qalabka sawirka lafaha ee X-ray, iwm.

Ruqsadle (Licensee): waxa loola jeedaa shirkad la siiyey oggolaansho bixinta adeegga isgaadhsiinta si waafaqsan xeerka boosaha iyo isgaadhsiinta.

Taawar (Tower): Waa bir kaligeed taagan ama lagu taageeray xadhko dhulka ku haya ama la dul saaray dhisme, kana samaysan bir. Waxa lagu rakibaa qalab isgaadhsiineed oo loo yaqaan (Anteno) kuwaas oo loo adeegsado lalinta iyo helidda fariimaha isgaadhsiinta.

Qodobka 5aad

Ujeedooyinka Xeer-Nidaamiyaha

Ujeedooyinka Xeer-nidaamiyahan waxa ka mid ah:

- 1) Xakamaynta saamaynta ay ku leeyihiin goobaha isgaadhsiintu caafimaadka bini aadamka, deegaanka iyo bilicda dalka, iyada oo la raacayo tilmaamaha ay u

dejisay Hay'adda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn (ICNIRP) ee ku cad Xeer-nidaamiyahan.

- 2) In aanu ka hor iman ama dhix-galin goobaha isgaadhsiintu wada shaqeynta shebekadaha kale ee isgaadhsiineed.
- 3) In ruqsadleyaasha lagu dhiiri geliyo wadaagidda kaabayaasha goobaha isgaadhsiinta.
- 4) Inay bulshadu hesho adeeg isgaadhsiineed oo waafaqsan xeer-nidaamiyayaasha dalka iyo kuwa caalamiga ah.

CUTUBKA 2AAD

DOORKA WASAARADDA

Qodobka 6aad

Shaqada Wasaaradda

Si loo hirgaliyo Xeer-nidaamiyahan, Wasaaraddu waxa ay qaadaysaa tallaabooyinkan soo socda;

1. In ay hubiso goobaha ku habboon ee la dhigayo taawarada iyo qalabka isgaadhsiinta.
2. In ay hubiso in goobta laga dhisayo goobaha isgaadhsiintu waafaqsan yihiin tilmaamaha u dejisan Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guryeynta.
3. In ay hubiso in qalabka la dhigayo goobaha isgaadhsiintu waafaqsan-yihiin shuruudaha ku xusan Qodobka 14aad ee xeer-nidaamiyahan.
4. In ay hubiso in goobaha isgaadhsiintu waxba u dhimayn bad-qabka deegaanka.
5. In ay hubiso in aanay goobaha isgaadhsiintu wax dhibaato ah ku keenayn adeegyada kale sida korantada, biyaha, bulaacadaha, waddooyinka iyo shebekadaha kale ee isgaadhsiinta.
6. In ay kormeerto xilliga ay shaqadu socoto si loo xaqiijiyo in goobta isgaadhsiintu wax dhib ah ku keenin bulshada ku xeeran sida sanqadha, hadhaaga dhismaha iyo bad-qabka shaqaalaha iyo dadwaynaha.
7. In ay ka dalban karto kana heli karto xogta ay uga baahan tahay ruqsadleyaasha si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan.

8. In ay la wadaagto hay'adaha dhiggeeda ah xaqijinta in xeer-nidaamiyahani waafaqsan-yahay xeer-nidaamiyayaasha kale.
9. Marka Wasaaraddu samaynayso kormeer si waafaqsan xeer-nidaamiyahan waxa goobjoog ka ahaanaya ruqsadleyaasha ama cid ay u igmadeen.

Qodobka 7aad

Shaqada Qalabka Kormeerka Goobaha Isgaadhsiinta

- 1) Qalabkan waxa loo adeegsanayaa helidda goobta (GPS), hirarka loo adeegsado iyo heerka shucaaca ee ka jira goobta.
- 2) Iyada oo aanay wax u dhimayn tayada adeegga ruqsadlahaa, qalabka kormeerka goobaha isgaadhsiintu waa inuu suurto geliyaa:
 - a) La socodka tayada adeegga isgaadhsiinta.
 - b) Diyaarinta tirakoob la xidhiidha taawarada iyo goobaha isgaadhsiinta ee ruqsadleyaasha.
 - c) Helidda faahfaahinta qalabka goobta lagu rakibayo.
 - d) Ururinta iyo kaydinta xogta la xidhiidha goobaha isgaadhsiinta.

Qodobka 8aad

Ilaalinta Xogta

- 1) Wasaaradda waxa ku waajib ah in ay ilaalso, xafiddo isla markaana kaydiso xogta goobaha isgaadhsiinta ee ay ka heshay ruqsadlayaasha.
- 2) Xogta goobaha Isgaadhsiinta ee Wasaaradu ku hesho si waafaqsan xeernidaamiyahan waxa loo tixgalinayaa sir u gaar ah ruqsadlahaa, waxaana masuul ka ah ilaalinteeda wasaaradda, waxaana reebban in sifo aan sharciga waafaqsanayn looga faa'iidaysto ama loogu gudbiyo dhinac sadexaad.
- 3) Hawl-wadeen kasta oo ka tirsan shaqaalahaa wasaaradda oo sifo aan sharci ahayn u bixiya ama u shaaciya xogta uu ku helay shaqada uu u hayo wasaaradda ee kormeerka goobaha isgaadhsiinta, waxa uu mutaysanayaa ciqaabta ku xusan Xeerk Ciqaabta ee la xidhiidha fal-dambiyeedka bixinta sirta.
- 4) Xogta goobaha isgaadhsiinta ee ku xusan qodobkan taasoo lagu helay si waafaqsan xeer-nidaamiyahan, waxa lagu bixin karaa oo kaliya marka ay hay'ad garsoor oo awood u lihi oggolaato.

CUTUBKA 3AAD

TILMAAMAH A LOOGA BAAHAN YAHAY GOOBAHA ISGAADHSIINTA

Qodobka 9aad

Qorshaynta Dhismaha Goobaha Isgaadhsiinta

Qorshaynta dhismaha goob isgaadhsiineed si waafaqsan xeer-nidaamiyahan waa in:

- 1) Ruqsadluhu wasaaradda la socodsiiyaa marka uu qorshaynayo dhismaha goob isgaadhsiineed oo cusub.
- 2) Ruqsadluhu qaadaa talaaboooyinka ku xusan Qdobada 16, 17, 18 iyo 19.
- 3) Haddii goobta isgaadhsiintu tahay mid ruqsadle keli ahi dhisanayo waxa ay wasaaraddu ku dhiiri-gelinaysaa in uu ugu talo geli doonaa in mustaqbalka la wadaagi karo marka lagu heshiyo.
- 4) Ruqsadluhu u hoggaansamaa tilmaamaha loo dhigay dhismaha goobaha cusub, tilmaamahaas oo suurto-gelinaya daboolidda baahida shirkad ama in ka badani ku wadaagi karaan goobtaas marka loo baahdo.
- 5) Qorshaynta, qaabaynta iyo hirgelinta goobaha la wadaagayo waxa lagu faahfaahin doonaa si waafaqsan heshiiska wadaaggga taawarka ee ruqsadleyaasha.

Qodobka 10aad

Qaabka Dhismaha Taawarka

- 1) Dhismaha Taawarka cusubi waa in uu la jaan qaadaa dhulka laga dhisayo, iyada oo la tixgelinayo dhererka iyo muuqaalkiisaba sida ku xusan "Tilmaamaha Farsamo" ee loo dejiyey.
- 2) Goob kastaa waa in ay hesho dhul ku filan islamarkaana ay xammili karto qalabka la saarayo ee hal shirkad ama wax ka badani adeegsanayaan (Sanaadiiqda Qalabka, Hoyga iyo Dabka).
- 3) Dhererka taawarrada cusub ee goobaha la deggan yahay waa inaanu ka yaraan dhereriisu **soddon mitir (30 mt)**.
- 4) Iyada oo la ilaalinayo caafimaadka iyo badqabka bulshada, lama dhisi karo taawaaro ay ku rakiban yihiin qalab lalineed goobaha iyo dhismayaasha Xasaasiga ah sida Goobaha Carruurku ku cayaarto, Dugsiyada, Xannaanooyinka Carruurta iyo Dhakhtarrada.
- 5) Goobaha ku xusan faqradda sare waa in ugu yaraan **shan iyo tobantir (15mt)** loo jirsiyaa goobaha ama taawarrada isgaadhsiinta.
- 6) Ruqsadluhu waa in uu masaafo dhan **lix mitir (6mt)** u jirsadaa goobaha dadwaynaha ama dhismayaasha la deggan yahay ee ku hareeraysan.

- 7) Ruqsadluhu waa in uu ku muujiyaa codsigiisa inta uu u jiro taawarkiisu goobaha xasaasiga ah sida ku cad faqradda 4aad ee qdobkan.
- 8) Qaabaynta taawaarada isgaadhsiintu waa in ay buuxiyaan shuruudaha looga baahan yahay ee ku xusan "Tilmaamaha Farsamo" iyada oo aan marnaba la khilaafi karin.

Qodobka 11aad

Qalabka Taawarka La-Saarayo

- 1) Qaabaynta dhismaha taawarrada waa in lagu saleeyaa xagga adaygga in uu xammili karo dhammaan culaysyada fuuli kara ee ruqsadle ama wax ka badani adeegsanayaan.
- 2) Dhererka taawarka iyo culayska la saarayo waa in lagu saleeyo xaaladaha dabaylaha waddanka, ciidda goobta iyo saadaasha dhul gariir.

Qodobka 12aad

Tilmaamaha Dabka

- 1) Goob kasta waa in ay hesho dab ku habboon iyada oo la tixgelin doono haddiiba shirkado kale goobta wax dhigato.
- 2) Si loo tixgeliyo qodobka hore xadhkaha dabka keenayaa waa inay lahaadaan kaabayaal dab oo ku haboon.
- 3) Dab ku filan baa laga siin doonaa goobta haddiiba uu yimaaddo ruqsadle kale, marka uu codsado.
- 4) Ruqsadluhu waa in uu soo raaciyo dab dhaliye kasta oo la dhigayo goobta Isgaadhsiinta caddaymo ah in aanu isdhexgal taban ku keenayn adeegyada kale ee ka jira goobta.
- 5) Ruqsadluhu dab-dhaliyaha uu adeegsanayo waa in aanu bulshada ku xeeran ku keenin gariir, sanqadh iyo qiiq ay dhibsadaan.

Qodobka 13aad

Qurxinta Goobta iyo Laydhinta Taawarka

- 1) Dhammaan taawarrada isgaadhsiinta waa in lagu qalabeeyaa laydhka digniinta ah si waafaqsan Tilmaamaha Hay'adda Duulista.
- 2) Dhammaan laydhadhka waa la kormeeri doonaa si waqtiyeyesan.
- 3) Waa in goob kasta ay yaallaan kayd ku filan si wixii xumaada dhakhso loogu beddelo.
- 4) Ruqsadluhu waa in uu qurxiyo rakibaadda qalabka isgaadhsiinta iyo taawarrada isaga oo raacaya "Tilmaamaha Farsamo".
- 5) Ruqsadluhu waa inuu goobaha isgaadhsiinta nidaamiyaa si loo yareeyo qalabka isgaadhsiinta ee dadku arkayaan.

- 6) Ruqsadluhu waa in uu u hogaansamaa nidaamka naqshadaha sida dariiqyada, dhismayaasha iyo deegaankaba marka uu qorshaynayo goob Isgaadhsiineed isla markaana aanay waxba u dhimin goobaha kale ee isgaadhsiinta.

Qodobka 14aad

Heerka Badbaado ee Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn

- 1) Wasaaraddu waxa ay kormeeraysaa Shucaaca maayadaha aan danabaysnayn ee qalabka isgaadhsiintu soo daayaan.
- 2) Wasaaraddu waxa ay hubinaysaa tayada qalabka lagu rakibayo goobaha isgaadhsiinta iyada oo diraasaynaysa shahaadada shirkadaha qalabka soo saara ay soo raaciyeen.
- 3) Wasaaraddu waxa ay raacaysaa halbeegga heerka shucaaca ee ay dejisay Hay'adda Caafimaadka Adduunku (WHO), Hay'adda Isgaadhsiinta Caalamiga ah (ITU) iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn (ICNIRP) kuwaas oo soo baxay 1998 dibna loo sugay 2009. (Eeg Shaxda Hoose).
- 4) Wasaaraddu waxa ay kormeeraysaa isla markaana hubinaysaa in ruqsadlayaashu ay raaceen habraacyada ay dajisay Hay'adda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn "ICNIRP" iyo Machadka Farsamada Korantada iyo Elektrooniga (IEEE).
- 5) Dabbaqaadda nidaamka ay dejisay Hay'adda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn (ICNIRP) ayaa ah mid lagu helay hab xisaabeed, isla markaana si looga taxaddaro waxa lagu calaamadinayaa gelista goobaha Anteenada.

Shaxda ay dejisay Hayadda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn (ICNIRP). Heerka shucaac ee qalabka marka loo eego hirarka isgaadhsiinta:

Hirarka	Xoogganaanta Bededda Koronto (V/m)	Xoogganaanta Bededda Danab (A/m)	Cufka Maayadda u Dhiganta (W/m ²)
Up to 1 Hz	-	3.2×10^4	-
1 - 8 Hz	10 000	$3.2 \times 10^4 / f^2$	-
8 - 25 Hz	10 000	$4 000 / f$	-
0.025 - 0.8 KHz	$250 / f$	$4 / f$	-
0.8 - 3 KHz	$250 / f$	5	-
3 - 150 KHz	87	5	-


0.15 - 1 MHz	87	0.73/f	-
1 - 10 MHz	$87/f^{1/2}$	0.73/f	-
10 - 400 MHz	28	0.073	2
400 - 2GHz	$1.375 f^{1/2}$	$0.0037 f^{1/2}$	f/200
2- 300 GHz	61	0.16	10

- 6) Qalabka ruqsadluhu uu dhigayo goobaha isgaadhsinta waa in uu waafaqsan yahay sida ku cad shaxda sare si loo xaqijiyo in aanu ku keenin wax caafimaadarro ah bulshada.
- 7) Wasaaraddu waa inay hubiso masaafada ay u jirisan karaan goobaha isgaadhsintu deegaanka dadweynaha iyo goobaha shaqada ee ay u dajisay Hay'adda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn "ICNIRP".
- 8) Masaafada ay goobaha isgaadhsintu u jirisanayaan goobaha dadwaynuhu deggan-yihiiin waa inaanay ka yaraan **lix mitir (6 meters)**.
- 9) Wasaaraddu waa in ay hubisaa masaafada la ogol yahay ee goobihii isgaadhsiineed ee hore loo dhisay, qaab waafaqsan qodobka hore.
- 10) Ruqsadluhu waa inuu u soo gudbiyo Wasaaradda warbixinaha dhammaan goobaha uu hore u dhisay, sida: Magaca goobta, Tix-raaca goobta, Barta ay dhacdo ee GPS ka.
- 11) Haddiiba uu soo baxo nidaam cusub oo ka yimid Hayadda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn "ICNIRP", waa in ruqsadluhu muddo 90 cisho ah ku dabbaqaa.

Qodobka 15aad

Calaamadaha Digniinta

- 1) Waa in lagu sameeyaa goob kasta calaamadaha digniinta taasi oo tusaysa shaqaalahi iyo dadweynahaba khatarta goobta.
- 2) Calaamadahani waxa ay caddaynayaan: Magaca Shirkadda leh goobta, magaca goobta, Tix-raaca goobta, heerka shucaaca iyo Telefoon Lamber loo adeegsado wixii dedeg ah.



CUTUBKA 4AAD

GOOBAHA ISGAADHSIINEED EE CUSUB IYO WAX KA-BEDDELKOODA

Qodobka 16aad

Codsiga Goobaha Cusub ee Isgaadhsiinta

- 1) Ruqsadluhu waa inuu wasaaradda u soo gudbiyaa codsiga dhisidda goobta cusub.
- 2) Ruqsadluhu waa in uu ku xusaa codsigiisa xarumaha cusub, baahida rasmiga ah ee jirta iyo in uu si fiican u adeegsaday goobihii hore, sidoo kalena soo raaciyyaa daraasad taageeraysa.
- 3) Ruqsadle kasta waxa ku waajiba ka hor inta aanu bilaabin qorshaynta goob ama taawar isgaadhsiineed, inuu soo buuxiyo foom (eeg lifaaqa 2aad) isaga oo soo gudbiyana:
 - a. Codsi ku socda Agaasimaha Guud ee Wasaaradda.
 - b. Khariidad caddaynaysa goobta laga dhisayo taawarka iyo cabbirkeeda.

- c. Waa in ay khariidadda ku cadaataa goobaha xasaasiga ah sida iskuulada, dhakhtarada iyo goobaha ay caruurtu ku ciyaarto.
 - d. Khariidadda goobta laga dhisayo taawarka oo ay ku caddahay, goobta taawarka laga taagayo, goobta laga dhisayo qolalka qalabka isgaadhsiinta iyo dabka, iyo qolka ilaalada.
 - e. Waa in goobtu ku filnaataa in uu ruqsadle kale adeegsan karo, sida ku cad qdobka 19aad.
 - f. Caddayn cidda iska leh dhulka laga taagayo taawarka, ama heshiiska kirada.
 - g. Nooca iyo shirkadda samaysay qalabka loo adeegsanayo goobta.
 - h. Naqshadda taawarka oo faahfaahsan (dhererka, asaaska hoose, nooca birta, laydhadhka, danab-tiraha, iwm).
 - i. Caddayn ah inaanay goobtu wax u dhimayn bilicda magaalada, deegaanka, adeegyada isgaadhsiineed ee jira iyo adeegyada kale ee bulshada.
 - j. Hirarka lagu adeegsanayo goobta.
 - k. Awoodda shucaac ee ka soo baxaysa qalabka.
 - l. Caddayn in ruqsadluhu u hoggaansanaan doono shuruucda “Hayadda Caalamiga ah ee Xakamaynta Shucaaca Maayadaha aan Danabaysnayn” (ICNIRP), (eeg lifaaqa 1aad).
- 4) Waa in aanay ka yaraan masaafada u dhexaysa goobta cusub iyo goob hore u dhisian **shan boqol oo mitir (500mt)**.
- 5) Ruqsadluhu ma codsan karo in uu goob cusub ka sameeyo Isgoysyada waddooyinka, haddii aanay lagama maarmaan u noqon qorshaha shabakadda oo aan loo waayin goob kale.
- 6) Ruqsadluhu waa in uu ku xisaabtamaa arrimaha farsamo ee dhismayaasha marka uu dhisayo goob isgaadhsiineed oo dhisme dushii ah.
- 7) Ruqsadluhu waa in uu masaafu dhan **lix mitir (6mt)** u jiirsadaa goobaha dadwaynaha ama dhismayaasha la deggan yahay ee ku hareeraysan.

Qodobka 17aad

Codsiga Cusboonaysiinta Goobta

- 1) Ruqsadle kastaa waa inuu Wasaaradda ogolaansho ka helaa marka uu cusboonaysiinayo birta taawarka ee goob isgaadhsiineed.
- 2) Ruqsadlahaa oo ay la socdaan hawl-wadeenno wasaaradda ahi waa in ay caddeeyaan qaybaha kala duwan ee cusboonaysiinta u baahan.
- 3) Wasaaraddu waxa ay ka dalban kartaa ruqsadlahaa inuu dib u cusboonaysiyo goob isgadhsiineed haddii loo arko inay daruuri tahay.

Qodobka 18aad

Codsiga wax-ka Beddelidda Qalabka

Ruqsadluhu mar-kasta oo uu wax-ka-beddel ku samaynaayo qalab saaran goob isgaadhsiineed taas oo ah casriyeyn adeeg waa inuu:

- 1) Codsi u soo qoraa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda.
- 2) Codsiga waa inay ku caddaataa sababaha keenay casriyeynta adeegga.
- 3) Codsiga waa in la soo raaciyyaa lifaaq caddaynaya hirarka lagu adeegsanayo iyo heerka shucaac ee ka soo baxaya qalabka cusub.
- 4) Caddayn sheegaysa halka ay ku dambaynayaan qalabka goobta laga beddalay.
- 5) Wawa ay wasaaraddu xaqqijinaysaa codsiga ruqsadla iyo baahida loo qabo casriyeynta adeegga.

Qodobka 19aad

Wadaagga Goobaha Isgaadhsiinta

- 1) Wasaaraddu waxa ay dhiiri-gelinaysaa wadaagidda goobaha isgaadhsiinta ee ruqsadleyaasha.
- 2) Ruqsadleyaashu waa in ay wadaagaan goobaha isgaadhsiinta si loo yareeyo Kharashka loona qurxiyo bilicda ee dalka.
- 3) Ruqsadluhu waa in uu raacaa dhammaan Tilmaamaha Wasaaradda ee waxyaalah looga baahan yahay goobaha la wadaago .
- 4) Ruqsadleyaashu waa in ay ka wada shaqeeyaan qorshaynta goobaha la wadaago iyo buuxinta shuruudaha ku xusan xeer-nidaamiyahan.
- 5) Haddii ruqsadle codsado goob cusub isla markaana goob uu leeyahay ruqsadle kale u jirto in ka yar **shan boqol oo mitir (500mt)**, waxa ay wasaaraddu dhiirigelinaysaa inay wadaagaan goobtii hore sidii ay suurta-galka ku tahay.

Qodobka 20aad

Tilmaamaha Caafimaad iyo Bedqabka ee Goobta

- 1) Ruqsadluhu waa in uu keeno dhammaan qalabka lagama maarmaanka u ah shaqada ee ay adeegsanayaan shaqaaluhu ee la xidhiidha bedqabkooda.
- 2) Wasaaraddu waa inay hubisaa in ruqsadluhu dhigay halka laga dhisayo goob isgaadhsiineed qalab badbaado oo ku filan kuna habboon taasi oo uu ka mid yahay dabdemiska iyo agabka gurmadka degdeggaa ah.
- 3) Dhammaan dhiska Taawarada iyo dhismayaasha dhaadheer si loo helo bedqabka shaqaalah, waa in ay noqdaan dadka ka shaqaynayaan kuwo u tabobaran.
- 4) Ugu yarran 2 qof waa in joogaan goobta mar kasta oo meel dheer la fuulayo.

- 5) Wax shaqo ah lagama qaban karo goobaha qodobbada sare ku xusan xilliyada ay hawadu xun tahay ama la rajeynao in xawaaraha dabayshu ka badan karto 50 km saacaddiba.
- 6) Dhammaan qalabka korantada iyo kuwo farsamo, iyada oo la xaddidayn noocyadooda, waa in ay noqdaan kuwo si fiican u shaqaynaya waqtii kasta oo la adeegsanayo.
- 7) Qalabka korantada waa inuu noqdaa mid u sahlaya shaqaalaha shaqada ay qabanayaan.
- 8) Goobaha Alxanka waa in laga helaa mar kastaba qalabka badbaado sida ku xusan faqaradda 1aad ee qodobkan.
- 9) Dhammaan goobaha lagaga shaqeeyo alxanka, jarista agabyada kala duwan iyo meelaha wax lagu kulayliyo waa in ruqsadluhu siyaasad cad u dejiyaa si waafaqsan hannaanka wanaagsan ee warshadaynta.
- 10) Sanduuqa Gurmadka Degdegga ah waa in uu goobta yaallaa mar kasta, islamarkaana shaqaaluhu ay ka warhayaan goobta uu yaallo aqoonna u leeyihiin habسامي u adeegsiga qalabkaasi.
- 11) Goob kasta oo shaqo laga qabanayo waa in la hubiyaa marka hore in shaqaaluhu adeegsan karaan qalabka gurmadka degdegga ah.

Qodobka 21aad

Wacyi-gelinta Dadwaynaha

- 1) Wasaaraddu waxa ay wacyi-gelin joogto ah ka siinaysaa bulshada, arrimahan hoos ku xusan:
 - a) Warbixinaha ruqsadleyaasha ee la xidhiidha Bededda Maayadda aan Danabaysnayn (NIR) ee hirarka raadyaha caafimaadkooda iyo siyaabaha looga badbaado.
 - b) Cilmi baadhisaха iyo warbixinaha la xidhiidha qalabka ay ruqsadleyaashu adeegsanayaan.

Qodobka 22aad

Socodsiinta Cabashada Dadwaynaha

- 1) Wasaaraddu waxa ay diyaarinaysaa nidaam ay bulshadu u soo gudbinayso cabashooyinka la xidhiidha goobaha isgaadhsinta.
- 2) Wasaaraddu waxa ay hubinaysaa cabashooyinka bulshada iyada oo hawl-wadeenada wasaaraddu tagayaan soona diraasaynayaan goobta iyo nooca cabashada.
- 3) Wasaaraddu waxa ay xal ka gaadhaysaa dhammaan cabashooyinka soo gaadha muddo aan ka badnayn **30 maalmood**, iyada oo la kaashanaysa ruqsadlaha cabashadu khusayso.

CUTUBKA 5AAD

GABAGABO

Qodobka 23aad

Kaabista iyo Wax-bedelka Xeer-Nidaamiyahan

- 1) Xeer-nidaamiyahan waxa lagu samayn karaa wax-ka-beddel iyo kaabis wakhtiga loo baahdo.
- 2) Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda ayaa leh awoodda wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 24aad

Dhaqangalka Xeer-nidaamiyahan

Xeer-nidaamiyahani waxa uu si rasmi ah u dhaqan geleya isla maalinta uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda laguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

Annex A:
Declaration of Conformity with ICNIRP
Public Exposure Procedures and Standards
(ICNIRP Declaration)

**Declaration of Conformity with ICNIRP Public Exposure Procedures and Standards
(ICNIRP Declaration)**

(Operator Logo)

(Operator Name)

(Operator Address)

Declares that the proposed equipment and installation as detailed in the attached site approval application at:

(Address) _____

Is designed to be in full compliance, when operational, with the requirements of the radio frequency (RF) public exposure procedures and standards of the International Commission on Non-Ionizing Radiation Protection (ICNIRP), as expressed in EU Council Recommendation of July 1999 "on the limitation of exposure of the general public to electromagnetic fields (1Hz to 300 GHz)". When determining compliance, the emissions from all mobile phone network operators on the site are taken into account.

Date: _____

Signed: _____

Name: _____

Position: _____

Annex B:
Cellular Mobile Base Station Site / Tower
Application Approval Form



Ref: MoCT/DoT/05/ /

Date: / /

Cellular Mobile Base Station Site / Tower

Application Form

Contact Details:	
Name: _____	Telephone: _____
Operator: _____	License Class & No _____
E-mail: _____	Address: _____
Site Details	
Site Name: _____	District: _____
Region: _____	City: _____
GPS Coordinates: _____	
Please Attach the Following:	
<ol style="list-style-type: none">1. Request letter to the Director General of the Ministry.2. A map showing the site location with GPS coordinates, nearby sites for the applicant licensee (within 500m), nearby sites for the other licensees (500m), schools, hospitals and playgrounds which are located within (15m) from the proposed site.3. A site layout plan showing the boundaries of the site, the position of existing and proposed of existing and proposed radio equipment for the other licensees, in case of sharing, the position of existing and proposed radio equipment for the applicant licensee.4. Description of planned radio apparatus;<ul style="list-style-type: none">• Type of structure (e.g. tower, mast etc.).• Antenna type make and model.• Height of antenna above ground level.• Operating frequency bands.• Transmitter radio frequency power (EIRP in dBW per carrier).5. Landowner or property approval (including, owner ID + Signed Lease Agreement).6. Additional information for Mobile Site Sharing (proposed site name, nearby sites names, coordination's & distance from the proposed location within 500m, reason for not sharing site if it is less than 500m, site area, notification reference to the other operator(s)).7. Declaration of conformity with ICNIRP procedures and standards. Signed by all licensees who will own and operate radio equipment at the proposed site.	

Ministry Review:

Name / Title of Signatory:

Signature: _____

Yes If in Compliance.

No If not in Compliance.

Request for further modification:

Director of Telecom Signature: _____